



La bilaabay:	5/1/2000
Ansixintii Ugu dambaysay:	10/9/2018
Beddelaaddii Ugu dambaysay:	10/9/2018
Dib u eegista Xigta:	10/8/2021
Milkiilaha:	<i>Suzanne Vanderwerff: Agaasimaha Sare (Senior Director), Wareegga Dakhliga (Revenue Cycle)</i>
Qaybta Dukumeentiga:	<i>Xukuumadeed</i>
Nooca Dukumeentiga:	<i>P&P</i>

Gargaarka Maaliyadeed, 10226

Siyaasadda/Nidaamka

UJEEDDADA:

In la qeexo waajibaadka iyo habdhaqannada isbitaalka Seattle Children's Hospital uga yaalla bixinta gargaarka maaliyadeed (daryeelka samafalka ah).

SIYAASADDA:

Isbitaalka Seattle Children's waxuu bixiyaa daryeel caafimaad ku habboon baahiyaha gaarka ah ee Bukaanaada Caafimaadka carruurta (sida hoos loogu qeexay) ee deggan Washington, Alaska, Montana, ama Idaho, iyadoo aanan la eegayn haddii ay lacagta iska bixin karaan. Gargaarka Maaliyadeed (Financial Assistance) (daryeelka samafalka ah) waxaa bukaanadan lagu siiyaa hab ku salaysan baahida qoyska iyo khayraadka ama dhaqaalaha isbitaalka. Isbitaalka Seattle Children's waxuu dejiyey shuruudo lagu bixiyo Gargaarka Maaliyadeed oo waafaqsan sharciga hirgalaya, kuwaasoo ay ka mid yihiin waajibaadka ku yaalla Tuduca 246-453 ee Xeerka Xukuumadeed ee Washington (Washington Administrative Code) (WAC), RCW 70.170.060, iyo § 501(r) ee Xeerka Dakhliga Gudaha (Internal Revenue Code) iyo shuruucda lagu hirgeliyo. Go'aannada laga gaaro u qalmista Gargaarka Maaliyadeed looma eego jinsiyadda, midabka, diinta (caqiidada), jinsiga, aqoonsiga ama muuqaalka jinsiyeed, jihada galmada, asalka qarameed (isirka), naafada, da'da, macluumaadka hiddesideyaasha, xaaladda guurka, dhalashada la haysto, uurka ama dhalmada, darajada ciidankii hore ee dhawran, ama darajo kaloo ku dhawran sharciga qaran, federaalka, gobolka, ama degaanka ee hirgalaya.

Isbitaalka Seattle Children's waxuu addeecaa Sharciga Daawaynta Caafimaadeed ee Degdegga ah iyo Shaqada Firfircoon (Emergency Medical Treatment and Active Labor Act) iyo shuruucda lagu hirgeliyo (EMTALA), isagoo bixiya baaritaanka caafimaadeed ee cudurro lagu baaro iyo daawaynta xasilinta ah ee habboon, isagoo aanan eegayn haddii shakhsigu uu lacagta iska bixin karo.

QEEXITAANNADA:

Adeegyada Caafimaadeed ee Habboon ee Isbitaalka Lagu bixiyo: Adeegyadaas si macquul ah loo xisaabiyo ee lagu soo helo, lagu saxo, lagu wada daaweeyo, lagu yareeyo, ama lagaga hortago xaaladaha sii xumaanaya ee nafta khatar geliya, ama keena dhibaato ama xanuun, ama ku dambeeya cudur ama tabardarro, ama keeni kara ama ka sii dari kara curyaanimo, ama keeni kara qallooca ama shaqada xun ee jirka, oo aanay jirin daawo waxtarkeedu midan la siman yahay oo ka taxaddar badan ama aad uga kharash yar oo loo heli karo ama ku habboon qofka adeegga codsanaya.

Gargaarka Maaliyadeed (Daryeelka Samafalka ah): Daryeelka caafimaadka ee isbitaalka ee caafimaadka loogu baahan yahay ee la siiyo dadka saboolka ah marka cayminta dhinaca kale, haddii ay jirto, laga wada dhammaaday, oo laga gaaray heer dadku aanay ku awoodi karin in ay lacagta ka bixiyaan daryeelka ama bixiyaan caddadyada dadka laga jaro ama caymiska la wada bixiyo ee uu rabo lacagbixiyaha dhinac kale ka socda.

Bukaanka Caafimaadka carruurta: Bukaanka jooga ilaa 21 jir ee daryeel ku hela isbitaalka Seattle Children's, ama bukaanka jooga 21 jir ama ka weyn ee helay Oggolaanshaha Bukaanka Da'da dhaafsan (Clinical Overage Approval) si loo siiyo daryeel gaar ah oo sida ugu fiican loogu bixiyo isbitaalka Seattle Children's taasoo loo maro hawsha ku qayaxan siyaasadda **Bukaanada 21 Jir ah ama Ka weyn.**

Degganaha: Shakhsiga isagu (a) ku nool Washington, Alaska, Montana ama Idaho (WAMI) inta ugu badan sanadka taariikheed; oo (b) ku tala jira in uu ku sii noolaado gobolka WAMI ka dib marka daawaynta la dhammaystiro.

Jadwalka Khidmadaha Kaladuwan: Jadwalka sicirdhimista uu go'aamiyo isbitaalka Seattle Children's, ee dadweynuhu arki karo ee ku toosan lacagaha lagu dallaco bukaanada/qoysaska loo arko in ay u qalmaan Gargaarka Maaliyadeed.

Cayminta Dhinaca Kale: Waajibka saaran shirkadda caymiska, qandaraaslaha adeegga daryeelka caafimaadka, ururka xafidista caafimaadka, heshiiska caafimaadka kooxeed, barnaamijka dawladda, dheefaha caafimaadka qabiileed, ama isutagga wadaaga daryeelka caafimaadka sida loogu qeexay 26 U.S.C. Sec. 5000A si ay u bixiyaan lacagta daryeelka bukaanada iyo adeegyada caynsan, waxaana ku jiri kara heshiisyada dacwadeed, go'aannada maxkamadeed, ama abaalmarinada dhab ahaan laga helo ficillada dayacaadda leh ee dadka kale ee keenay xaaladda caafimaad ee uu bukaanku u helay adeegga daryeelka caafimaadka ee isbitaalka.

NIDAAMKA:

I. Helitaanka Adeegyada Degdegga ah:

- A. Helitaanka baaritaanka cudur lagu baaro iyo daawaynta xasilinta ah ee habboon laguma daahin doono lagumana diidi doono kartida uu shakhsigu u leeyahay in uu bixiyo lacagta adeegyada ama go'aanka laga gaaro cayminta caymiska shakhsiga ama u qalmista gargaarka maaliyadeed.

II. Baaxadda Gargaarka Maaliyadeed:

- A. **Hawlgallada:** Marka la raaco ujeeddada siyaasaddan, Gargaarka Maaliyadeed waxaa looga jeedaa cafinta buuxda ama qayb ah ee baaqi kastoo bukaanka kaga maqan dhanka isbitaalka Seattle Children's Hospital ee soo hara ka dib marka bukaanka/qoyska u qalma loo hirgeliyo nidaamka habboon ee dhinaca kale. Lataliyeyaasha Maaliyadeed ayaa weliba bixin kara qiimayno marka la codsado, gargaar laga helo codsashooyinka barnaamijka Medicaid ama Heshiiska Caafimaadka ee U qalma (Qualified Health Plan) (QHP), iyo dejinta heshiisyo lacagta lagu bixiyo oo aanan dulsaar lahayn. Lataliyeyaasha Maaliyadeed waxaa laga heli karaa lambarka (206) 987-3333.
- B. **Lacagaha lagu daboolo Gargaarka Maaliyadeed:** Gargaarka maaliyadeed waxaa lagu toosin doonaa Adeegyada Caafimaadeed ee Habboon ee Isbitaalka Lagu bixiyo.
 - 1. Lacagaha ku toosan adeegyada qurxinta ah ama la doorto looguma qalmo Gargaarka Maaliyadeed. (Eeg tusaalooyinka ku jira LIFAAQA I)
 - 2. Gargaarka Maaliyadeed ma aha barnaamij lagu maalgeliyo adeegyada (a) uu bixin karo adeegbixiye kaloo ka mid ah shabakadda caymiska bukaanka; iyo (b) aanay shirkadda caymisku oggolaanin in shabakadda gudaheeda looga bixiyo isbitaalka Seattle Children's.

C. Adeegbixiyeyaasha soo hoosgala Gargaarka Maaliyadeed:

1. Adeegbixiyeyaasha Bukaaniifka isbitaalka Seattle Children's:

- a. Lacagaha tas-hiilaadka isbitaalka Seattle Children's;
- b. Lacagaha xirfadeed ee ay ku dallacaan adeegbixiyeyaasha u shaqeeya ama qandaraas ka haysta isbitaalka Seattle Children's ama Children's University Medical Group (Kooxda Caafimaadeed ee Jaamacadda ee Children's) (CUMG) marka CUMG ay qaansheeg ka bixiyaan adeegyada bukaaniifka ee lagu bixiyo isbitaalka Seattle Children's *ama* isbitaal bulsheed; iyo
- c. Lacagaha xirfadeed ee ay ku dallacaan adeegbixiyeyaasha u shaqeeya ama qandaraas ka haysta isbitaalka Seattle Children's marka isbitaalka Seattle Children's uu qaansheeg ka bixiyo adeegyada bukaaniifka ee lagu bixiyo isbitaalka Seattle Children's *ama* isbitaal bulsheed.

2. Adeegbixiyeyaasha Bukaansocodka isbitaalka Seattle Children's:

- a. Lacagaha tas-hiilaadka ee ay ku dallacaan isbitaalka ama kiliniigyada Seattle Children's;
- b. Lacagaha xirfadeed ee ay ku dallacaan adeegbixiyeyaasha u shaqeeya ama qandaraas ka haysta CUMG marka CUMG ay qaansheeg ka bixiyaan adeegyada bukaansocodka ee lagu bixiyo kiliniigga, waaxda bukaansocodka, ama goobta bulsheed ee isbitaalka Seattle Children's;
- c. Lacagaha xirfadeed ee ay ku dallacaan adeegbixiyeyaasha u shaqeeya ama qandaraas ka haysta isbitaalka Seattle Children's, marka isbitaalka Seattle Children's uu qaansheeg ka bixiyo adeegyada bukaansocodka ee lagu bixiyo kiliniigga, waaxda bukaansocodka, ama goobta bulsheed ee isbitaalka Seattle Children's; iyo
- d. Dhammaan adeegyada loogu qalmo ee adeegbixiyeyaasha isbitaalka Seattle Children's ay ka bixiyaan Kiliniigga Dhowr iyo toban jirka ee dugsiga sare ee Garfield High School (taasoo ku salaysan dakhliga loo maleeyo in ay helaan carruurta oggolaanaysa in ay daryeel laftigoodu helaan).

3. Adeegbixiyeyaasha ka baxsan:

- a. Adeegbixiyeyaasha bulsheed ee faa'iidooyinka jifinta ka haysta isbitaalka Seattle Children's ee qaansheeg ka bixiya lacagaha xirfadeed ee iyaga gaar u ah ee doorta haddii ay gargaar maaliyadeed ka bixinayaan qaansheegyadooda gaarka ah kaasoo u dhigma siyaasadda gargaarka maaliyadeed ee isbitaalka Seattle Children's. Lifaaqa II ka eeg liiska adeegbixiyeyaashaas bulsheed ee faa'iidooyinka jifinta ka haysta isbitaalka Seattle Children's iyagoo lagu kala saaray magaca iyo xirfadda ee aanan raacin go'aannada uu isbitaalka Seattle Children's ka gaaro gargaarka maaliyadeed.

D. **Muddada** – Gargaarka maaliyadeed waxaa caadi ahaan lagu bixiyaa qaybo lix bilood ah, hase yeeshee, **waa haddii** Gargaarka Maaliyadeed ee laga bixiyo daryeelka degdegga ah loo oggolaan doono oo keliya taariikhaha la helo daryeelkaas; waxaana oggolaanshooyinka xukuumadeed iyo malaynta leh laga bixin doonaa muddada uu adeegbixiyo go'aamiyo. Bukaanaada ama dhinacyada masuulka ah waxay taas dib u dalban karaan waqti kaste.

III. Shuruudaha U qalmista Gargaarka Maaliyadeed:

Waa in ay bukaanadu buuxiyaan **dhammaan** shuruudaha soo socda si ay ugu qalmaan Gargaarka Maaliyadeed:

- A. **Degganaanshaha** –Waa in uu bukaanku degganaado Washington, Alaska, Montana, ama Idaho (sida kor ku qayaxan).

1. **Ka reebitaanada:**

- a. Isbitaalka Seattle Children's waxuu Gargaar Maaliyadeed oo waqti kooban ugu deeqi karaa bukaanada deggan meel gobolladan ka baxsan marka bukaanadaasi ay qabaan cudur aanan hore loo saadaalinin, oo degdeg ugu kaca.
- b. Bukaanada lagu tallaalo xubnaha jirka ee adag ee deggan Oregon ama Hawaii waxay u qalmi karaan Gargaarka Maaliyadeed maadaama ay gobolladani qayb ka yihiin aagga tallaalista UNOS ee isbitaalka Seattle Children's Hospital.
- c. Sarkaalka Maaliyadeed ee Guud (Chief Financial Officer) ama qofka u magacaaban ayaa si ikhiyaar leh u dooran kara in uu cafiyo ama dhafo shardiga degganaanshaha isagoo kiis kasteba eegaya marka ay jirto in daryeelku uu diyaar ka yahay oo keliya isbitaalka Seattle Children's. Waxaa la filayaa in cafinadaas la bixin doono marar go'go'an.

B. **Da'da** – Waa in uu bukaanku noqdo Bukaan Caafimaad carruur (sida kor ku qayaxan).

1. **Ka reebitaanada:**

- a. Dadka qaangaarka ah ee lagu baarayo ama lagu daawaynayo isbitaalka Seattle Children's si loogu sii wado daryeelka Bukaanaka Caafimaadka carruurta ee isbitaalka Seattle Children's (tusaale ahaan, ka baarista cudurka qaaxada ama ka baarista hiddesideyaasha) ayaa u qalmi kara Gargaarka Maaliyadeed. Waxaa tan ka mid ah dadka qaangaarka ah ee daryeel u hela xaalad caafimaad oo dhalashada ka horraysa.

- 2. Bukaanada 21 jir ah ama ka weyn ayaa u qalmi kara Gargaarka Maaliyadeed marka (a) ay heleen Oggolaanshaha Bukaanaka Da'da dhaafsan si loo siiyo daryeel gaar ah oo sida ugu fiican loogu bixiyo isbitaalka Seattle Children's sida ku qayaxan siyaasadda **Bukaanada 21 Jir ah ama Ka weyn**; ama (b) ay helaan baaritaan caafimaadeed oo cudur lagu baaro iyo/ama daryeel xasilin ah oo ay ka helaan Waaxda gurmada Degdegga ah (Emergency Department) (ED).

C. **Maalgelinta Kale** – Gargaarka Maaliyadeed ee isbitaalka Seattle Children's waa il labaad oo maalgelin laga helo ka dib dhammaan fursadaha kale ee ka diyaar ah Cayminta Dhinaca Kale iyo maalgelinta, taasoo ay ku jiraan laakiin aanan ku koobnayn caymiska caafimaadka ee kooxeed ama shakhsiyeed, barnaamijyada dawladda ee loogu qalmo xataa Medicaid, masuuliyadda dhinaca kale ama barnaamijyada magdhawga shaqaalaha, sanduuqyada magacaaban ee deeqda ama hanti ilaalinta, ama dadka ama hay'adaha kale ee masuul ka ah bixinta lacagta adeegyada caafimaadeed.

Bukaanada aanan haysanin meel kaloo ay maalgelin ka helaan, xataa kuwa (a) aanan caymis lahayn; (b) uusan caymiskoodu u cayminin adeegyada la bixiyey ama la bixin doono; ama (c) caymiskooda ku cayman laakiin faa'iidooyinka ama dheefuhu ay aad u kooban yihiin marka la raaco qiimaynta isbitaalka Seattle Children's, waxaa loo baahan doonaa in ay dalbadaan barnaamijka Medicaid ka hor inta aanan la siinin Gargaarka Maaliyadeed. Bukaanada is qoray isutag lagu wadaago daryeelka caafimaadka si loogu bixiyo kharashyada daryeelka caafimaadka waxaa loo arkaa in aanay caymis lahayn. Waxuu bukaanku dooran karaa in uu iibsado Heshiiska Caafimaadka ee U qalma (QHP), marka habboon, halkii uu iska qori lahaa barnaamijka Medicaid. Lataliyeyaasha maaliyadeed ee isbitaalka Seattle Children's ayaa diyaar u ah in ay qoysaska ka caawiyaan hawsha codsashada barnaamijka Medicaid ama codsashada heshiiska QHP. Lataliyeyaasha maaliyadeed ayaa cafin kara ama dhaafi kara shardiga codsashada barnaamijka Medicaid haddii, tusaale ahaan, ay go'aamiyaan waqtiga ay baarista ku gudo jiraan in bukaanku uusan u qalmi doonin barnaamijka Medicaid. Isbitaalka Seattle Children's ayaa xaq u reebanaya in uu codsado xaqiijin qoran oo lagu xaqiijiyo in uusan bukaanku u qalmin ilo kaloo maalgelin.

Haddii bukaanka/qoysku ay sabab falsafiyad, diimeed, ama mid kaloo shakhsi ahaaneed ku diidaan dalbashada barnaamijka Medicaid, oo ay FPL ugu jiraan inta u dhexeysa 134% iyo 599%, gargaarka maaliyadeed ee ugu badan ee la bixin doono waa boqolkiiba 50 (50%) Jadwalka Khidmadaha Kaladuwan. Qoysaska adeegyo u qorshaysan yihiin ee dakhligoodu FPL uga sarreeyo 200% waxaa laga codsan karaa in ay dabaaji hore u bixiyaan.

- D. **Dakhliga** - Bukaannadu waxay u qalmi karaan Gargaarka Maaliyadeed ee buuxa haddii bukaanka ama dhinaca masuulka ahi uu buuxinayo shuruudaha codsashada oo uu leeyahay dakhli qoys oo guud oo jooga ama ka hooseeya 400% ee Xeerasha Saboolnimada Federaalka, marka loo hagaajiyo qiyaasta qoyska. Haddii qofku uu yahay iskiis u shaqayste, waxaa la isticmaalaa macluumaadka dakhliga saafiga ah (ee jeebka). Isbitaalka Seattle Children's xisaabta uu ku sameeyo dakhliga qoyska ee guud waxuu ka jari doonaa caddadyada qoysku shakhsi ahaan ka bixiyaan lacagaha rukumashada caymiska caafimaadka si loogu caymiyo dadka soo hoosgala ee da'doodu ka hoosayso 21 jir. Waxaa la codsan karaa dukumeentiyada dakhliga si loo hubiyo macluumaadka lagu tilmaamay foomka codsashada, xataa waraaqaha yar yar ee mushaarka iyo/ama warbixinnada canshuureed ee dakhliga.

Dhinacyada masuulka ah ee dakhligoodu u dhexeeyo 400% iyo 599% ee Xeerasha Saboolnimada Federaalka waxay u qalmi karaan Gargaarka Maaliyadeed ee Jadwalka Khidmadaha Kaladuwan iyagoo markaa masuul ka noqon doona qiyaas boqolley ah oo ka mid ah caddadka lagu leeyahay. Marka ay sidan tahay waxay iyagu masuul ka noqonayaan qaybta habboon ee ka mid ah caddadka weli lagu leeyahay, oo Gargaarka Maaliyadeed ee isbitaalka Seattle Children's ayaa xallinaya baaqiga xisaabta ku soo haray.

Dakhliga la soo caddeeyey waqtigii adeegyada bukaanka la bixiyey ayaa loo isticmaali doonaa go'aannada laga gaaro Gargaarka Maaliyadeed. **Ka reebitaanka:** Haddii dakhliga la soo caddeeyey waqtigii codsashadu uu keenayo in qoyska loo oggolaado gargaarka maaliyadeed halkii looga diidi lahaa, waxaa la isticmaali doonaa dakhligaas hoose.

Mararka uu dhinaca masuulka ahi si kale ugu qalmayo sicirdhimista caymis la'aanta ama sicirdhimista shaqaalaha uuna weliba u qalmayo Gargaarka Maaliyadeed ee Jadwalka Khidmadaha Kaladuwan, dhinaca masuulka ah waxuu heli doonaa oo keliya Gargaarka Maaliyadeed ee Jadwalka Khidmadaha Kaladuwan, kaasoo ah sicirdhimista ugu deeq badan. Sicirdhimis kaladuwan lama saaro isla xisaab keliya.

- E. **Codsashada** –Waa in bukaanka ama dhinaca masuul ka ah uu foom codsasho diro isagoo:

- i. foomka internetka ku buuxinaya halkan www.seattlechildrens.org;
- ii. foom warqad ku qoran ka soo daabacanaya isla bartan internetka oo boostada ama fakis ugu diraya sida ku tilmaaman foomkaas; ama
- iii. buuxinaya codsasho warqad ah, taasoo laga soo qaadan karo miis kastoo diiwaangelin ee isbitaalka Seattle Children's ama lagu heli karo boostada iyadoo uu soo diro lataliyaha maaliyadeed, waxuuna taas boostada ama fakis ugu dirayaa sida ku tilmaaman baakadkaas codsashada.

Codsashooyinka waxaa la diri karaa ka hor inta aanan adeegyada la bixinin, waqtiga daryeelka la wado, ama ka dib marka adeegyada la bixiyo.

- F. **U qalmista Loo maleeyo** - Mararka bukaanka si macquul ah loogu malayn karo in uu u qalmo Gargaarka Maaliyadeed, oo aanan la filan karin in hawlaha codsashada ee caadiga ah ay dhibaato ka timaaddo arrimo bulsho iyo dhaqaale ama kuwo kale awgood, Agaasimaha Caafimaadeed (Medical Director), Sarkaalka Guud ee Maaliyadeed ee isbitaalka Seattle Children's, ama Agaasimaha Sare ee

Wareegga Dakhliga, ama qofka u magacaaban, ayaa xukunkiisa u adeegsan kara si uu bukaanka ugu tilmaamo in uu u qalmo Gargaarka Maaliyadeed inta ay maqan yihiin dhammaan macluumaadka loo baahan yahay. Maxaa dheer, marka qoysku ay codsashadooda soo raaciyaan macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xaaladdooda maaliyadeed, isla shakhsiyaadkan ayaa xukunkooda u adeegsan kara si ay macluumaadkan ugu go'aamiyaan Gargaarka Maaliyadeed. Isbitaalka Seattle Children's waxuu dib u eegi karaa macluumaadka muhiimka ah ee dadweynuhu arki karo ee ku saabsan xaaladda maaliyadeed ee qoyska, marka laga reebo warbixintooda deymeed (credit report), mararka qoysku ay ka soo jawaab celin waayaan qaansheeg laga diray baaqi ku maqan, waxuuna Gargaarka Maaliyadeed ee loo maleeyo u oggolaan karaa u qalmistaas baaqiga maqan marka uu macluumaadkan eego. Dhammaan Gargaarka Maaliyadeed ee si loo maleeyo loo oggolaado waxaa lagu toosin doonaa oo keliya baaqiyada hore deyn u ah.

IV. Hawsha Go'aaminta Gargaarka Maaliyadeed:

- A. **Dukumeentiyada** – Dhammaan macluumaadka ku saabsan codsashada waxaa lagu hayn doonaa sir. Isbitaalka Seattle Children's ayaa u qalmista ku go'aamin doona afar iyo toban (14) maalmood gudahood ka dib marka la helo dhammaan macluumaadka loo baahan yahay. Isbitaalka Seattle Children's ma bilaabi doono tallaabooyin aanan caadi ahayn oo lacagta lagu soo qaado waqtiga uu ku gudo jiro hawsha dib u eegista codsashada.
1. **Oggolaanshooyinka** – Waxaa codsadhaha loo diri doonaa warqad lagu sheegayo oggolaanshaha Gargaarka Maaliyadeed iyo muddada u qalmistu soconayso.
 2. **Laalista** – Haddii macluumaad aanan dhammaystirnayn lagu helo codsashada, ama bukaan/qoys ay buuxin waayaan hawsha u qalmista barnaamijka Medicaid waqtiga looga baahan yahay, waxaa la laali doonaa ama la hakin doonaa codsashada waxaana codsadhaha loo diri doonaa warqad loogu sheegayo sababta codsashada loo laalay. Haddii macluumaadka lagu soo jawaab celin waayo ka dib 14ka maalmood ee ogaysiintaas ku xiga, waxaa laga yaabaa in codsashada la diido.
 3. **Diidmooyinka** – Haddii isbitaalka Seattle Children's uu go'aamiyo in bukaanku uusan u qalmin Gargaarka Maaliyadeed, diidmo qoran ayaa codsadhaha loo gudbin doonaa waxaana taas ku jiri doona sababta(baha) ka dambeeya diidmada, taariikhda go'aanka, iyo tilmaamaha ku saabsan rafcaan qaadashada ama dib uga fiirsiga.
 4. **Rafcaannada** - Codsaduhu waxuu ka rafcaan qaadan karaa diidmada u qalmista gargaarka maaliyadeed isagoo macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dakhliga, qiyaasta, masuuliyadaha kalee maaliyadeed ee qoyska, ama arrimaha kalee muhiimka ah u diraya Agaasimaha Sare ee Wareegga Dakhliga (Senior Director of Revenue Cycle) ama Agaasimaha Hawlgallada Wareegga Dakhliga (Director of Revenue Cycle Operations). Agaasimaha Sare ee Wareegga Dakhliga ama Agaasimaha Hawlgallada Wareegga Dakhliga ayaa dib u eegi doona rafcaannada dhammaantood si ay go'aamin kama dambays ah ugu sameeyaan. Haddii go'aamintan kama dambaysta ah lagu xaqiijiyo diidmadii hore ee gargaarka maaliyadeed, ogaysiin qoran ayaa loo diri doonaa codsadhaha iyo Waaxda Caafimaadka (Department of Health) sida waafaqsan sharciga goboleed.

Haddii bukaanka/qoyska ama dhinaca kalee ka masuul ah ay lacag ka bixiyaan Adeegyada Caafimaadeed ee Habboon ee Isbitaalka Lagu bixiyo oo ka dib la soo ogaado in bukaanka/qoysku ay buuxiyeen shuruudaha Gargaarka Maaliyadeed, lacagaha bukaanku bixiyey ee lagu toosiyey adeegyada tas-hiilaadka 90kii maalmood ee ka horreeyey go'aaminta u qalmista waxaa marka hore lagu toosin doonaa ama lagu dabooli doonaa baaqiyada kalee maqan, waxaana lacagaha soo hara markaa dib loogu soo celin doonaa soddon (30) maalmood gudahood. Lacagaha la bixiyo ee lagu toosiyo adeegyada xirfadeed waxaa la soo celin doonaa

oo keliya marka la codsado. Haddii bukaanka/qoyska loo diido u qalmista Gargaarka Maaliyadeed oo aanay haysanin il ama meel kaloo ay lacag ka helaan ama sicirdhimis, waxaa lacagaha tas-hiilaad iyo xirfadeed ee bukaanka si toos ah looga bixin doonaa sicirdhimis boqolkiiba 25 ah. Bukaanka ama dhinaca masuul ka ah lagama codsado lacagaha buuxa. Sicirdhimista heerkan ahi waxay u dhigantaa ama ka badan tahay sicirdhimista isku celceliska ah ee lagala xaajoodo dhammaan lacag bixiyeyaasha waaweyn ee aanan ku xirnayn barnaamijka Medicaid.

B. Gargaarka Maaliyadeed ee Jadwalka Khidmadaha Kaladuwan:

Marka dhinaca masuulka ah uu u qalmo Gargaarka Maaliyadeed ee Jadwalka Khidmadaha Kaladuwan, isbitaalka Seattle Children's bukaanka kuma dallici doono in ka badan caddadka isku celceliska ah ee laga qaaday lacagbixiyeyaasha dhammaantood (Medicare, Medicaid iyo lacagbixiyeyaasha ganacsatada ah) sanad canshuureedkii buuxay ee isbitaalka ee ugu dambeeyey. Waxaa tan weliba loo yaqaannaa "caddadyada qaansheegga caadi u ah" (amounts generally billed) ama AGB.

Lifaafa III ka eeg caddadka ugu badan ee masuuliyadda maaliyadeed ee hadda marka la haysto Gargaarka Maaliyadeed ee Jadwalka Khidmadaha Kaladuwan.

V. Tababbarka Shaqaalaha

- A. Shaqaalaha habboon ee ku jira jagooyinka sida ugu badan loo filan karo in ay ku lug yeeshaan wadhadallo qoysaska lagala yeesho gargaarka maaliyadeed, xataa dhammaan kuwa ku jira jagooyinka diiwaangelinta, isbitaal jiifinta ama wareegga dakhliga, waa in ay sanad walba ka qayb qaataan muqarar tababbar ah oo ku saabsan gargaarka maaliyadeed, xataa sida loo adeegsado qalabka ama khayraadka luqadda si ay ugu suurtoogasho in ay caawiyaan qoysaska aanan af Ingiriisiga si fiican ugu hadlin ama kuwa Dhego la' ama Dhego Culus.

VI. Wararka loo diro Dadweynaha:

Macluumaadka ku saabsan siyaasadda Gargaarka Maaliyadeed ee isbitaalka Seattle Children's waxaa dadweynaha loogu soo bandhigaa sidatan:

- A. Ogaysiinta Dadweynaha/Turjumaadda – Ogaysiin ayaa laga muujiyaa meelaha muhiimka ah ee dadka u furan ee isbitaalka ka mid ah, sida goobaha koowaad ee diiwaangelinta dadweynaha iyo Waaxda gurmada Degdegga ah, iyadoo lagu qoro luqadaha ay ku hadlaan in ka badan boqolkiiba 10 shacabka deggan aagga laga bixiyo adeegga isbitaalka: Ingiriisi, Isbaanish, Fiyatnamiis, Ruush iyo Soomaali. Maxaa dheer, siyaasadda Gargaarka Maaliyadeed ee isbitaalka Seattle Children's, soo koobista siyaasadda Gargaarka Maaliyadeed oo ku qoran hadallo cad, iyo foomka codsashada Gargaarka Maaliyadeed ee ku dhigan isla luqadahan ayaa ku jira barta internetka isbitaalka Seattle Children's ee ah www.seattlechildrens.org. Waxaa barta internetka ku jirta fursad dheeraad ah oo suurtoogelinaysa in dukumeentiyadan midkood ama dhammaantood lagu turjumo luqad kaloo lagaga dhex hadlo bulshada taasoo lagu soo sameeyo 7-10 maalmood gudahood.
- B. Ogaysiinta Shakhsi ahaaneed – Isbitaalka Seattle Children's waxuu si macquul ah ugu dadaali doonaa in uu soo ogaado haddii uu jiro dhinac kaloo masuul ka ah bixinta lacagaha Adeegyada Caafimaadeed ee Habboon ee Isbitaalka Lagu bixiyo dhammaantood ama qayb ahaan, iyo weliba in uu qiimeeyo haddii qoysaska soo galaya goobaha daryeelka isbitaalka Seattle Children's ay rabaan in ay macluumaad ka helaan ama loo baaro Gargaarka Maaliyadeed. Foomamka codsashada warqad ah ee ku qoran af Ingiriisi, Isbaanish, Fiyatnamiis, Ruush ama Soomaali ayaa laga soo qaadan karaa miisaska diiwaangelinta dhammaan kiliniyada isbitaalka Seattle Children's.
- C. Lataliyeyaasha Maaliyadeed – Lataliyeyaal Maaliyadeed, oo ay diyaar u yihiin adeegyada turjumaanka luqadaha aanan af Ingiriisi ahayn, ayaa lagu heli karaa fool ka fool iyo dhinaca telefoonka (206-987-3333) si ay gargaar uga bixiyaan buuxinta codsashada.

- D. Qaansheegyada ama biilasha bukaanka waxaa ku jiri doona bayaan ku yaalla bogga koowaad ee qaansheegga oo ku qoran af Ingiriisi iyo weliba af Isbaanish, ama af Soomaali, Fiyatnamiis, ama Ruush haddii ay tani tahay luqadda aasaasiga ah ee qoyska u diiwaangashan, kaasoo lagu sheego diyaar ahaanta gargaarka maaliyadeed, haddii la haysto cayminta caymis iyo haddii kale, iyo iimaylka ama lambarka telefoonka lala xiriiri karo si gargaar dheeraad ah loo helo.

Waxaa ansixisay Waaxda Caafimaadka Gobolka Washington: Okt 9, 2018

LIFAAQA I:

Adeegyada uu isbitaalka Seattle Children's go'aamiyey in ay yihiin kuwo la doorto ama qurxin ah oo aanan markaa u qalmin Gargaarka Maaliyadeed waxaa ka mid ah, laakiin kuma koobna:

1. Adeegyada hagaajiska ilkaha qalqallooca marka aanay jirin xaalad caafimaadeed oo ku hoos jirta
2. Dadka qaangaarka ah ee baaritaanka hiddesideyaasha u raba si loogu go'aamiyo haddii xaalad hiddeside loo gudbin karo carruurta mustaqbalka AMA baaritaanka hiddesideyaasha ee bukaanka marka baaritaankaasi uusan bixin karin macluumaad qayb ku yeesha qorshaha daryeelka bukaanka
3. Hawsha dib u qaabaynta dhegta ee nidaamka Earwell ee qurxinta ah
4. Qalliinka iftiinka laser ee loo qabto oo keliya ujeedooyin qurxin ah
5. Qalliinka dhegaha ee loo qabto ujeedooyin qurxin ah
6. Beddelaadda xajiyeyaasha ilkaha ee dhacay
7. Barnaamijyada/fasallada caafimaadka maskaxda ee la doorto

LIFAAQA II:

Adeegbixiyeyaasha bulsheed ee faa'iidooyinka jifinta haysta ee qaansheeg ka bixiya lacagaha xirfadeed ee adeegyada ay ka bixiyaan isbitaalka Seattle Children's xafiiska iyaga gaar u ah, ee aanan gargaar maaliyadeed oo u dhigma go'aannada isbitaalka Seattle Children's ka bixinin qaansheegyadooda gaarka ah, waxay ku taxan yihiin halkan hoose.

Adeegbixiyaha calaamadda xiddigtu ku ag taallo waa midka u shaqeeya ama qandaraas ka haysta isbitaalka Children's ee weliba bukaanada ka soo gudbiya xafiiskiisa bulsheed si adeegyo loogu siiyo isbitaalka Children's. Gargaarka Maaliyadeed waxaa la bixiyaa oo keliya marka adeegbixiyuhu uu bukaanada ku arko kaalinta shaqaalaha ama qandaraaslaha isbitaalka Children's.

Liiskan waxaa la beddeli karaa saddexdii biloodba mar, waxaana lagu cusboonaysiiyaa halkan www.seattlechildrens.org.

Magaca Xafiiska ama Adeegbixiyaha

Caafimaadka carruurta ee Allegro Pediatrics

Dr. Senait Abraham Sea Mar Medical Clinic

Dr. David Atherton Caafimaadka ilkaha ee Carruurta & Dhowr iyo toban jirka

Dr. Molly Capron Neighborcare - Columbia City

Dr. Felix Chu The Polyclinic - First Hill

Dr. Daniel Downey Qalliinka Qurxinta ah ee Downey (Downey Plastic Surgery)

Dr. Mary Farrington Virginia Mason Medical Center

Dr. Julie Francis Eastside Dermatology Inc.

Dr. Heather Henne Neighborcare - Columbia City

Dr. Robin Hornung Everett Clinic

Dr. Shayan Irani Virginia Mason Medical Center

Dr. David Jeong Virginia Mason Medical Center*

Dr. Neil Kaneshiro Caafimaadka carruurta ee Woodinville Pediatrics

Dr. Richard Kozarek Virginia Mason Medical Center
Dr. Thomas Lenart Takhaatiirta Indhaha ee Carruurta (Children's Eye Doctors)
Dr. John Liu Eastside Pediatric Dental Group
Dr. Sally Sue Lombardi Eastside Pediatric Dental Group
Dr. Kimberly McDermott Neighborcare - Columbia City
Dr. Craig Murakami Virginia Mason Medical Center
Dr. Michael Nuara Virginia Mason Medical Center
Dr. Hee-Jung Park Virginia Mason Medical Center
Dr. Mary Pew Neighborcare - Meridian*
Dr. Donna Quinby Eastside Pediatric Dental Group
Dr. Seth Schwartz Virginia Mason Medical Center
Dr. Peter Shelley Xarunta Indhaha & Iftiinka laser ee Federal Way (Federal Way Eye & Laser Center)
Dr. Jessica Tarantino ABCD, Inc.
Dr. Cornelius Van Niel Sea Mar Comm Health Center
Dr. Michael Whelan Sound Surgery*
Dr. Bryan Williams Caafimaadka ilkaha ee Daryeelka Gaarka ah leh ee Seattle (Seattle Special Care Dentistry)*
Dr. Dali Wu Sea Mar Comm Health Center

LIFAAQA III

Marka la raaco dhammaystirka sanad canshuureedka 2017, caddadka ugu badan ee lagu dallici doono bukaanka haysta gargaarka maaliyadeed ee Jadwalka Khidmadaha Kaladuwan waa boqolkiiba 50. Caddadka qaansheegga caadi u ah ama AGB ee sanad canshuureedkii 2017 ee ku toosnaa lacagbixiyeyaasha dhammaantood waxuu ahaa boqolkiiba 50.

Dukumeentiyada la socda:

Dukumeentiyo lama socdaan

Saxiixaha Ansixinta

Qeexitaanka Tallaabada	Ansixiyaha	Taariikhda
Siyaasadaha Rukhsaynta	Daabacaadda & Nidaamyada: Siyaasadaha & Nidaamyada	10/9/2018
	Russell Williams: Madax Ku-xigeenka Sare & COO	10/9/2018
	Suzanne Vanderwerff: Agaasimaha Sare, Wareegga	10/8/2018
	Dakhliga [&P]	

Awoodda hirgelinta

Isbitaalka Seattle Children's Hospital